



[www.tyttöjenjuttu.fi](http://www.tyttöjenjuttu.fi)

Talaalka-HPV wuxuu ka ilaalinayaa gabadhaada

# KANSARKA KU DHACA AFKA ILMO-GALEENKA

Gabadhaada waxaa la siinayaa talaal ka hor taga afka ilmo-galeenka fiiriska babilooma (HPV) kansarka uu u keeno. Talaalkani wuxuu ka mid yahay barnaamijka talaalka caalamiga ah wuxuuna u yahay lacag la'aan dhammaan gabdhaha fasalka lixaad ah ee da'doodu tahay 11-12-sano jir. Talaalkan waxaa laga bixinayaa xarunta daryeelka caafimaadka ee iskoolka.

## SABABTU MAXAY TAHAY AY GABADHAADU UGU BAAHAN TAHAY TALAALKA-HPV?

Infaktiyada-HPV waxaa keena fiiriska loo yaqaan babilooma. Infaktiyadani waa mid caam ah oo dunida ku faafsan: qiyaastii tobankii qof siceed ka mid ah ayuu inteeey nool yihiin ku dhacaa. Infaktiyada caadiga ah ee HPV wax calaamado ah ma laha waana wax hal mar ku dhaafaya. Tobankii qof hal qof ayaa infaktiyadani ku daba dheeraadaa, markaas oo uu dhaliyo darajo hor dhac ah oo kansar biloo ah u eg. Qaar ka mid ahna waxay isu badalaan kansar. Kansarka ku dhaca ilmo-galeenka afkiisa waxaa sanadkii u jirada qiyaastii 150 haween ah. Kuwaas oo 50 ka mid ah ay u dhintaan.

Talaalku wuxuu hor istaagaa riskiga ama khatarta weyn ee HPV-infektiyadiisa. Infektio haddii uusan dhicin ma dhasho kansar. Talaalku wuxuu ka celiyaa qiyaastii shantii qof oo la talaalo affar ka mid ah kansarka intooda badana waxay noqdaan kansar darajo biloo ah oo la daweyn karo. Hase ahaatee talaalka waa in la siiyo gabdhaha inta ay yaryar yihiin, markaas oo ah wakhti uusan gabdhaha wali ku dhicin fiiruskii.

Fiiriska babilooma wuxuu ku faafaa oo la isugu gudbiyaa galmada. Infektiyada cudurkan si buuxda laguma joojin karo xataa haddii gondhob la isticmaalo, sababta oo ah fiirisku wuxuu ku dhagaa marka laga reebo xuubka gudaha maqaarka kor ku dahaaran.

## TALAALKANI INUU BAD-QABO OO UUSAN DHIB KEENIN WAX BADAN AYAA LAGA OG YAHAY

Talaalka-HPV wuxuu ka mid yahay borogaraamka talaalka ee dhammaan wadamada Yurubta-Galbeed iyo Maraykanaka laga isticmaalo. Talaalkan waxaa ilaa iyo sanadkii 2007 la siiyey toban milyan oo qof. Finland qiyaastii 70-80 boqolkii oo gabdho ah ayaa ilaa iyo hadda talaalkan u helay qayb ahaan. Waxyeelada uu talaalkani keeni karo waxaa loo baaray si sugan.

Dadka badankiis waxaa ku dhaca calaamado markaba dhaafa, sida in meesha laga muday xanuunto oo gaduudato oo bararto. Waxaa intaasi dheer oo dadka qaarkiis lagu arkaa daal, madax xanuun, qandho iyo sidoo kale lalabo. Waxyeelada ugu darani waa sida, riyaagshan xoogan oo alarjig ah, kuwaas oo aad iyo aad dhif u ah.



## BAARITAANKA DHEECAANKA EE LAQAADO EE LOO YAQAAN PAPA MA AHA MID KA HOR TAGA HEERKA BILOOWGA AH EE KANSARKA MANA HOR ISTAAGO KANSAR OO DHAN

Testiga-Papa waxaa lagu raadiyaa oo laga baaraa afka ilmo-galeenka kansar heer biloo ah maraya. Haddii isbadal yar oo fudud oo unagyada ku dhacay la dareemo waa la sugaa oo dusha lagala socdaa, laakiin haddii la helo unugyo kansar heer biloo ahi ku dhacay waxaa la isku dayaa in qaliin lagu baabi'iyo. Heerka boloowga ah qaliin ku saaristiisa waxaa khatartiisu tahay in ilmo-galeenka afkiisa waxyeelo la gaarsiyo oo la siyaadiyo khatar ah in ilmuhu markii uur la yeesho soo dhaco.

Baaritaanka Papa waxay yaraysay kansarkii iyo dhimashadii loo dhiman jiray, laakiin ma aysan yarayn HPV-infektiyadiisaa iyo kansarkii heerka bilooowga ah ku jiray cadaddiisi. Dumarka da'doodu ka hoosayso 40-sano jir waxaa wayaadan dambe siyaaday kansarka ilmo-galeenka afkiisa kaga dhaca, iyadoo walibana lagu sameeyo testiyo baaritaan oo Papa loo yaqaan.

## TALAALKAN WAXAA KALOO LOOGA FAA'IDEYSTAY IN LOOGA HOR TAGO KANSAR DAD KALEETO KU DHACA

Waxaa baaritaanada sidoo kale lagu xaqiijiyey in talaalkani uu yareeyo HPV-infektiyadu kansarka ay u keento xubnaha galmada, waxaa sidoo kale talaalkani yareeyey kansarka ku dhaca afka iyo qoorta. Maadaama talaalka-HPV uu yareeyo in fiirisku uu bulshada ku dhex faafo waxaa talaalka gabdhaha la talaalayo sidoo kale ku jirta faa'ido ah in wiilasha kansarka ku dhacana laga hor tago.

*Waalidka wanaagsanoow, kala hadla gabadhiina talaalka-HPV oo kala sheekaysta. Kala sheekaysta, barta oo aqoon u yeesho mawduucan. Hadalkaagu waalid ahaan waa muhiim! Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan talaalka-HPV waxaad ka helayaa iskoolka gabadhaadu dhigato kalkaalisadiisa caafimaadka iyo bogga internetka ee [www.tyttöjenjuttu.fi](http://www.tyttöjenjuttu.fi)*



TERVEYDEN JA HYVINVOINNIN LAITOS